
SIDEE LOO NOQDAA ARDAY GUULEYSTA?

How to be a Successful Student?





Waan dhacay ⇨ **Wan diyaarin waayey**







Wan helay talo | **Wan akhriyey** | **wan guuleystay**

W/Q: AHMED YUSUF MATAN

SOO SAARISTII 2AAD. JUNE/2015

Mogadishu – Somalia



HORDHACA BUUGGA

Buuggan loogu tala galay ardayda ku dhexjirta waxbarasha hadafka ugu weyn ee loo soo saaray waa in ardayga/yadda soomaliyeed uu kahelo/kahesho caawinaad dhanka diyaarinta casharada, imtixaanaadka, sida loo yareeyo walwalka imtixaanka iyo in uu ka ogaado astaanta/calaamadaha ardayga wanaagsan ama guuleysta warwalba.

Daabacaaddii koowad iyo middan labaad waxay ku kala duwan yihiin dhanka cutubyada oo lasoo badiyey iyo warbixino cusub oo lagusoo kordhiyey cutubyadii hore. Waxaa kaloo lagu soo daray qaababkale oo loo diyaariyo casharada iyo imtixaanaadka.

Buuggan waxa uu si’ bayyaansan uga hadli doona arimahaa aan kor kusoo sheegay.

XUQUUQDA BUUGGA©

COPYRIGHT ©

Dhamaan xuquuqda buuggan way dhowrantahay. qeyb ka mid ah buuggan lama daabicikaro, nuqulna lagama sameykaro ayadoo ogolaansho laga helin qoraaga buugga©.

MAHADNAQ

Ugu horeyn waxaa mahad u sugnaatay allahii ina abuuray. Kaasoo suura galiyey soo saarista buuggan. Marka labaad waxaan u mahadcelinayaa dhamaan asxaabtii ka qeyb qaadatay soo saarista buuggan, dhanka fikradaha iyo dhiiragalinta ay igu siiyeen inan soo saaro daabacaadii Labaad ee buuggan.

TUSMADDA BUUGGA

1. SIDEE LOO NOQDAA ARDAY WANAAGSAN? ---------- 6

2. SIDEE LOO DIYAARIYAA CASHARADDA? ----------13

3. HORA U EEGIS, AQRIN IYO DIB U EEGIS ----------22

4. SIDEE LOO DIYAARIYAA IMTIXAANAADKA? ---------27

5. SIDEE LOO MAAREEYA WALWALKA IMTIXAANKA? ----30

6. WAQTIGA IMTIXAANKU BILAABANAYO ----------33

7. GUNAANADKA BUUGA ----------37

CUTUBKA 1.aad

SIDEE LOO NOQDAA ARDAY WANAAGSAN?

Hordhac

Ugu horey waxaan u baahannahay inaan isweydiino *wanaagu* waxa uu yahay?. *wanaagu* waa cagsiga Xun ama xummaan. Haddii si' guud loo tilmaamo qofka wanaag lagu tilmaami karo waa 'qofka soo buuxiya shuruudaha ka dagsan halka uu ku sugan yahay'. tusaale. Haddii nin ka ganacsada maandooriye shaqaalihiisu daacad u noqdaan, waxa uu ku tilmaami doonaa iney wanaagsan yihiin shaqaalihiisa. Dhanka kale haddii maamulka iskuulka ardaydiisa ay soo wada buuxiyaan shuruudaha ama nidaamka iskuulka u dagsan asagane ardaydiisu wuxuu dhihi doona ardaydeydu waa ay wanaagsan yihiin'.

Hadaba haddii aan erayga *wanaag* labadaa dhinac u dhici karo, su'aasha ka dhalaneyso waxay tahay kee baa ah wanaaga rasmiga ah?. Aduunku waxaa ka jira caqiidooyin kala duwan, qofwalbana waxaa haga waxa

uu aaminsanyahay, micnaha diinta uu heysto waxa ay farto iyo waxa ay ka reebto. Hadaba qofka waxaa laga doonayaa in uu sal uga dhigo diintiisa iyo dhaqankiisa suuban marka uu rabo inuu ogaado eraygan ah wanaag.

Intaa haddaan ku fahanay erayga wanaag. Waxaa xiga inan ka jawaabno su'aashii cinwaankeena. Arday wanaagsan marka aad rabto inaad noqoto waa inaad marwalbo niyadda ku heysaa ama dhowrtaa shuruudaha iyo nidaamka iskuulkaada ama jaamacaddaada u dagsan.

Guusha ardayga

Guusha iyo wanaagu waa laba wada shaqeeya marwalba. Ardayga wanaagsan, kaaso garanaya nidaamka iyo shuruudaha xarumaha waxbarasho ayaa ah midka guuleysta marwalba.

Sidaa darteed haddii aad tahay arday doonaya inuu guuleysto ama aflaxa, waxaa lagaaga baahanyahay in aad isweydiso su'aasha ah sidee baa ku noqonkartaa arday guuleysta?.

Su'aashaa hadad sifiican jawaabteeda u haleesho waxaan rajeynayaa in aad noqon doonto arday guuleysta. Marka hore waxaa isweydiin mudan in guusha ama guuldarrada ay ku xirantahay inaad adiga leedahay HADAF iyo DOONIS. Haddii aadan laheyn hadaf amaba aysan kugu jirin wax aad dooneysid, way adagtahay sida aad meel u gaarto. Maxaa yeelay somalida waxay dhahdaa 'ninka dhunsan waddadii uu qaadaba waa waddadiisa'. Adna haddii aadan hadaf dagsanin, inaad waxbarashada sii wado iyo inaad ka harto waxba iskuguma kaa dhaanto maxaa yeelay wax aad ku hamineyso inaad gaarto maba jiraan.

Hadafka guud ee ardaygu waa in uu noqdo mid waxbartay, marwalbane ku hamiyo inuu noqdo midka fasalka ugu horeeya. Sidaasi darteed haddii aad tahay arday waxaa lagaaga baahanyahay inaad hadafkaa aan kor kusoo shegnay aad adigane marwalbo qalbiga ku heysid, aadna isweydiso 'hadafkaagii maxaa kaaga hirgalay'. Hadad noqotane midka hogaamiya fasalka dhanka waxbarashada iyo kaalmaha fasalka waxaa lagaaga baahanyahay inaad booskaada xajisato, aadna la

tartanto ardayga kaalinta labaad kusoo jira, haddii kale waxaa dhaceysa in uu iska kaa hoosmariyo, dadaal dheeraad ah uu soo sameeyo awgeed, adne kaalinta labaad laguusoo diro.

Intaa marka aan kasoo gudubno, ardayga iyo dagsashada hadafkiisa. Dhanka kale waxaa looga baahanyahay ardayga in qodobadaan uu dhaqan galiyo.

1. **Qadarinta macalimiinta**

   Macalimiinta oo la qadariyo waxay qeyb libaaxleh ka qaadataa wanaaga iyo guusha ardayga. Hadaba arday walbo oo doonaya inuu guul ka gaaro noloshiisa waxaa laga doonaya in macalinkiisa uu qadariyo, xushmeeyo, dhageysto, hadal suuban/wanaagsan kula hadlo waqtiga xisadda socoto iyo waqtiyada kalaba.

2. **Ka qeyb qaadashaada nashaadaadka**

   Ardayda wanagsan waxyaabaha lagu garto waxaa ka mid ah in uu heegan u yahay barnaamijyada fasalka, sida:- wax soo diyaarinta, baxsiga, xafladaha, gudiyada iskuulka/jaamacadda, Barnaamijyadda

subixii ee iskuulada qabtaan, ufaa'ideynta ardayga kale waxyaabaha uu dheeryahay iyo Inuu ka faa'ideysto ardayda asaga wax dheer.

3. Ka shaqeynta leyliyada kala duwan

Macalinwalbo wuxuu bixiyaa su'aalo casharka kadib, amaba casharwalba waxaa ka danbeeyo weydiimo, Ha ahaadaan kuwo looga shaqeeyo fasalka (classwork) ama shaqo guri (homework). Ardaygu waa in uu isku dayyaa ka shaqeynta su'aalahaa/mas'alooyinkaa kaligiisa, ka hor inta uusan la wadaagin arday kale. wixii aad fahmi weyso la kaasho ardayga/yadda dhinacaada fadhiyo/so, ama macalinkaada /macalimaddaada.

4. Fahan iyo dhageysi

Inta xisadu socoto ama macalinka ku jiro sharaxaadda casharka waxaa lagaaga baahanyahay inaad la socoto macalinka, si' aad u fahanto casharka. Isku ilaali inaadan ku mashquulin arday hadlaya ama waxyaabo kale kuwaasoo kaa

mashquulinkara dhageysiga casharkaada sida mobile lada, internetka iyo dhageysiga idaacadaha.

5. Dib u eegis casharka

Sharaxaada casharka kadib waa inaad dib u eegtaa casharka inta uu macalinka taaganyahay, ama aad diyaarsataa su'aalihii kaaga dhexdhashay intii sharaaxaadu socotay. Si' ixtiraam ku dheehantahay u weydii macalinka wixii aad hilmaantay ama aadan fahmin iyo su'aalahaadi casharka kaagasoo baxay. Macalinka haweydin su'aal inta sharaxaadu socoto haddii aysan muhiim aheyn.

Haddii ay dhacdo in aad Janis u heliweyso dib u eegista casharka inta uu macalinka ku jiro, ama macalinkale uusoo galo fasalka, marka aad guriga tagto kadib waqtiyada wax aqriska dib u eeg, oo hoosta kasoo xariikh su'asha, erayga ama mas'alada aad soo fahmi weysay, weydii macalinka xisadda ugusoo horeyso ee uu soo galo fasalka. Su'aalaha waxaa haboon in aad kusoo bandhigto fasalka dhexdiisa maxaa yeelay waxaa laga yaaba in

ardaykale ka faa'ideysto amaba su'aashaadii ardaykale kasoo dhexsaaraan su'aalo kale, kuwaasoo adiga dan/faa'ido kuu noqonkara.

6. **Wax soo jeedinta**

Mararka qaar waxaa dhacda in lagusoo istaajiyo ardayda hortooda, ama laguugu qoro cashar si' aad usoo jeediso, ha diidin, hana dhibsanin, maxaa yeelay maslaxadaada ayaa kujirto, waxaa laguugu sii tarbiyeynooya sidii aad cilmiga aad baranoysid u gudbin laheyn mustaqbalka. Waxaa dhacda in cashar uusan macalinka kuu dhigin lagu yiraahdo soo diyaari birito, ardayda hortooda ayaadna ka aqrin doontaa, su'aalo ayaana lagaa weydiin doona. Waa inaad aqbashaa, soona diyaarisaa. Cilmi kuu siyaaday ayuu noqon doona.

F.G. 'casharka aad ardayda hortooda kasoo jeediso wuxuu ka mid noqdaa casharada kuwa aanan ka bixin qalbigaada, qeybta xasuusta'.

CUTUBKA 2.aad

SIDEE LOO DIYAARIYAA CASHARADDA?

Diyaarinta casharada ma ahan kuwo saacad iyo waqti kooban ku eg, ee diyaarintu waa hadba casharka laguusoo dhigo sidii aad u daba gali laheyd inta aad xasuusato sharaxaadiisa. Hadaba casharada diyaarintu waxay martaa marxaladooyin kala duwan. Waxayna kala yihiin sidan soo socoto:

1. **Qorshee waxa aad qabanayso isla markaana kala hormari jadwalkaaga waxbarasho.**

Ardaygu waa inuu bartaa qorshaynta, iyo kala-mudnaanta hawlaha uu odorosayo. Qorshayntu waxay ka bilaaban taa inaad is-weydiiso "waa maxay hadafkaagu?". Kadib marka aad ogaato hadafka aad howshan u qabaneyso waxaad ku dhaqaaqda qaabkii aad uqaban laheyd. Tusaale ahaan waxaad tahay arday iminka maraya fasalka sagaalaad ee dugsiga dhexe. Maxaa hadaf kuu noqon kara dhanka wax aqrinta? Waxaad dhihi kartaa "sanadkan aan bilaabayo waxaan

rabaa inaanan maadooyinka aan dhiganayo midna ka hoosayn 90%". Kadib hadaf adag ayaad dagsatay, wadadii aad u mari laheyd ayaa lagaaga baahanyahay inaad la timaado.

Hawlaha lagaaga baahan yahay waxaa ka mid ah wax-akhris, qoraal, hawl-wadareed aad ardayda kale la wadaagto, baaris ilaha/meelaha kale ee aqooneed, iwm. Marka hawlaha aad qabanayso kuu kala caddaadaan waxaad u baahan tahay inaad kala hormariso, mudnaantana siiso kuwa waxbadan ku soo kordhinaya hadafkaaga.

Marka aad doorato hawlaha aad is leedahay haddaad qabato waad ku liibaanaysaa, is waydii waxaad u baahan karto ee khayraad ah sida buugta, internet-ka, lacag, qalab, saaxiibadaada aad isku galaaska tihiin, macalinkaaga, iyo cid kasta oo wax kugu tari karta.

F.G ***"Qorshaha wanaagsan ayuunbay nolosha wanaagsani ka bilaabantaa".***

2. Akhri, faham oo dadaal dheeraad ah ku bixi duruustaada

Xaqiiqadu waxay tahay in aqoontu ka dhalato, ku kobocdo/korto, kuna adkaato akhriska wax ku oolka ah ee fahamku wehliyo. Markaad tahay arday dadaalaya, mustaqbalkiisana dan ka leh, waxaa kugu waajiba inaad wakhti badan u hurto inaad akhriso duruusta laguu soo dhigay, ka shaqayso laylisyada, baarto culuumta la xidhiidha aqoontaada, iyo aqoonta guudba.

Sidee baa hadaba ugu haboon oo wax loo akhriyaa? Waxaa jiraan habab badan oo wax loo aqriyo, waxaan kasoo qaadaneyna midka aadka loo isticmaalo, loona yaqaano marka lasoo gaabiyo **SQ3R** – **S**urvey, **Q**uestion **R**ead, **R**ecite, **R**eview. micnahoodu kala yahay sidan hoos ku qoran. Haddaad si' fiican u raacdo qaabkan wax aqriska ah waxaad dareemi doonto isbadal dhanka aqoonta iyo waliba dhanka wax aqrinta oo kuu fududaato (insha allah).

Waxaan mid mid usoo qaadan doona erayadii lasoo gaabiyey ee aan kor kusoo xusnay sharaxaadahooda. Midwalbane sifiican ufahan qaabka loo sharaxay.

- Fiirfiirin guud (**Survey**). Si kor ka eegis ah ayaad ku sameyneysaa waxa aad rabto inaad aqriso ama aad fahanto, sida hordhaca buuga, cinwaanada, qoraalada jaantusyada, gaba gabada buuga, iyo hadduu leeyahay meel lagusoo koobay hadafka guud ee buugga ama cutubka (summary).
- Su'aal (**Question**). Cinwaanka, iyo cinwaan hoosaadyadaba waxaad ka sameyneysaa su'aal, Si' aad ufahanto micnaha guud ee cinwaankaa ama cinwaan hoosaadkaa. Tusaale:- cinwaanada kor ku qoran midkood haddan soo qaato, '*qadarinta macalimiinta*', su'aal ayaan ka sameynaa '*sidee loo qadariyaa macalimiinta?*', kadib hadhow markaan aqrinaayo qoraalka ku saabsan cinwaankaa waxaan heli doona jawaabta su'aashaa. Sidoo kale akhri su'aalaha cutubka, kadibna naftaada waydii su'aalahan: "muxuu macalinku cutubkan iga waydiin karaa?, maxaan hore uga aqaanay cutubkan? IWM".

- Aqrin (**Read**). Hadda wixii ka danbeeyo waxaad bilaabeysaa aqrintii rasmiga aheyd. Inta aad akhrinayso qoraalka isku day in aad si'fiican u fahanto qoraalka, kadibna niyada ku hey inaad xal u hesho su'aalihii jawaabahooda. Si' aad su'aalahaagii jawaab ugu hesho, dib u aqri macnaha iyo qoraalada ku hoosyaal sawirada, jaantusyada, IWM. Waxaad si'-gaar ah u eegtaa meelaha xariiqda la hoosdhigay, farta la yara seexiyay (italic), amaba la muujiyay (**bold**). Meelaha aan kuu cadayn ama madmadaw kaa galana xawaaraha akhriska hoos u dhig, kuna noqnoqo haddii aad mar kaliya ku fahmi waydo.

- Dib u dhihid (**Recite**). Su'aalo hadal ahaana iska waydii wixii aad hadda akhrisay, ama soo koob adiga oo isticmaalaya ereyo adigu aad leedahay. Ku Calaamadey meelaha muhiimka ah qalinka calaameeyaha haddaad heli karto, ama hoosta qalib qori kaga xariikh. Maxaa yeelay waxaa kuu fududaan doonta marka aad dib u eegis ku sameyneyso goordanbe inaad isla markiiba indhaha ku dhufato/aragto meelaha muhiimka ah.

Inta badan Inaad dib u xasuusato wixii aad akhrisay waxaa kaa saacidaya haddii aad isticmaasho dareemayaal dhowra sida: araga, dhihida, maqalka IWM.

- Dib u eegis ama naqtiin (review). Wixii aad akhrisay ee aad dib-u-dhihida ku samaysay baad hadana su'aalo iska waydiinaysaa si aad xoog ugu sii fahanto. Caadiyan talaabadan ugu dambaysaa waa mid joogto ah oo lagaa rabo inaad samayso marar kala duwan si aad u weelayso, u fahamto una jilciso wixii aad akhriday. Waan akhriyay halna ka garan maayo maahan laba is qabta.

  F.G. Haddii hanaankani uu kaa caawin waayo akhris wax-ku-ool ah, EEG qaabka kale eek u cad ***cutubka 3.aad*** ama waxaad baartaa hanaanada kale ee wax loo akhriyo ee la tijaabiyay. Waxaad ogaata hal maalin oo dariiqan aad raacdo inaadan wax isaga badaleynin ee Wuxuu u baahan yahay samir, ku celcelin, iyo jilcin ama naftaada inaad barto muddo dheer.

3. **Qorshee wakhtigaaga, samayso jadwal, isla markaana maamul wakhtigaaga si wax ku oola.**

Hawlaha aad qabanayso markaad taxdo, waxaad u baahan tahay inaad waafajiso wakhtiga aad mid walba qabanayso adiga oo iska-hor-iyo-daba keenahayn. Jadwal fudud samayso oo xiriirinaya hawsha iyo wakhtiga. Kaasi wuxuu kaa caawin doonaa inaad sahal u aragto, una fuliso si' fudud hadba hawsha kuu taala. Intaa waxaa kasii muhimsan waa *"inaad naftaada ku ilaaliso kuna koontaroosho jadwalkaas"*. Hadaba, jadwal kasta ma waxtarbuu leeyahay?, jawaabtu waa Maya. Maxaa yeelay jadwalku waxaa laga rabaa inuu noqdo mid ku caawinaya adiga, oo isu dheeli tiraya noloshaada. Haddii aad hawl ka buuxiso uun wakhtigaaga waxaa xaqiiqo ah in aad daalayso. Sidaa daraadeed hubi in jadwalkaaga ay ku jiraan wakhti raaxo iyo wakhti maran/banaan oo aad ugu talo gasho hawlaha soo darsa/kordha.

- **Mar walba dib-u-eegis ku samee, qiimee ,isla markaana horu-mari hanaanka aad u maamusho wakhtiga.**

Marwalba dib u qiimee, sida aad wakhtiga u maamusho. Hababka aan shaqaynayn badal, kuwa lagu reeyayna/guuleystayna xooji, kuwo cusub oo waxtar lehna soo kordhi.

Waxaa muhiim ah inaad iska ilaaliso waxyaabaha wakhtiga lumiya ama dayaca oo uugu wayn yahay "dib-u-dhigistu". Arin walba waxaa fiican inaad qabato wakhtigeeda. Haddii aad dib u dhigto, wuxuu kordhiyaa culayska ku saarmaya beri ama shaqada birito. Carabtaa ku maahmaahda "hawl maanta aad qaban karto dib ha ugu dhigin berito". Waxyaabaha dhalinta wakhtiga ka lumiya waqtiyadan waxaa ugu badan dhowr shay: daawashada kubada iyo filimada/musalsalada, fadhiisiga maqaaxiyaha, sheekada telefoonka, iyo la jooga saaxiibada. Waxaasoo dhan waxaa aabo u ah "han yaraan iyo hadaf la'aan".

Waxaa muhiima inaad maalintaada la noolaato oo aanad isku mashquulin wixii tagay. Waa inaad khaldin maanta wixii shalay kaa qaloocday/qaladay, berina waa inaad ku talogashaa inaad qabato wax ka fiican wixii maanta.

Ugu dambayntii, ardayga wanaagsani waa kan qorshaysta noloshiisa, hadaf samaysta, han iyo hiigsi leh, duruustiisa ku dadaala, wax badan akhriya, aan ka seexan waajibaadka loo soo diro, fasalka soo xaadira markasta, isla markaana wakhtigiisa ka fii'aadaysta.

Hadaba haddii aad dooneyso horumar, sumcad, iyo aqoon waxaa lagaaga baahanyahay inaad soo raacdo dariiqa lagu bartay ardaydii aduunka soo martay, kuwaasoo noloshoodu ka gaaray horumar. Kuna soo kordhiyey aduunkan waxyaabo aanan horay loo arag.

Dariiqaa aan tilmaamay ee lagaaga baahanyahay waa midka aan ku tilmaamay ardayga wanaagsan.

CUTUBKA 3.aad

HORA U EEGIS, AQRIN IYO DIB U EEGIS

Hora u eegista qoraal waa habka ugu habood ee lagu eego Tusmada buuga ama cutubka. Ugu horeen aqri hordhaca si' aad u barato sababta buugga loo qoray. Marka labaad aqri Tusmada buugga uu ka kooban yahay si' aad u barato/fahanto qaabka buugga uu u qaabeysanyahay dhanka fikradaha.

Mararka qaar mala kulantaa dhibaatooyinka dhanka fahanka iyo inaad soo xasuusan weydo wixii aad aqrisay?. Ma dareentaa daraasadda aad wado/baraneyso in caqabad kaa heysato?. Haddey sidaa tahay raac qaabkan *hora u eegis* (preview), *aqris* (read) iyo *dib u eegis* (review).

Hora u eegis (preview)

Hora u eegista buug ama cutub wuxuu kaa caawinayaa inaad horay usii fahanto hadafka iyo dulucda buuga ama cutubka. Marka aad rabto inaad sameyso hora u eegis

waxaa lagaaga baahanyahay inaad aqriso meelahan soo socda:

B) waxaad aqrisaa dhamaan tusmadda buuga ama cutubka tusmadiisa. dulmar (outline) haddii uu leyahay cutubka aqri, qoraal gaabanna ka sameyso.

T) ha aqrinin cutubka, waxaad marka hora eegtaa erayadda gaarka ah (vocabulary) ee lagu qoray farta buurbuuran (bold) ama jiifta (Italic), inta badan erayadan waxaa lagu soo taxaa dhamaadka buugga ama cutubka.

J) aqri halka lagusoo kooban muhiimadda buuga ama cutubka (summary).

Aqrin (reading)

Marka aad kasoo gudubto marxaladdii koowaad ee hora u eegista ah waxaa kuxiga Aqrin. Qeybtan oo ah aqrintii rasmiga aheyd ee buugga ama cutubka. Waxaad aqrin doontaa dhamaan buugga ama cutubka. Haddaba marka aad aqrineyso buug ama cutub ma dareentaa in aad xiiseyso buug ama cutub, midkalena aad ku caajisto/nacdo aqrintiisa?. Iskuday inaad raacdo qaabkan

wax aqris, kaasoo kaa reebi kara dhibaatooyinka aqris ee aad dareento mararka qaar, sidoo kale wuxuu kor u qaadi doona fahankaada iyo joogteynta wax aqrinta.

Cinwaan walbo oo aad aragto ka same su'aal kadibna ka fikir wixii aad ka taqaano cinwaankaa. Warbixinooyin cusub ayaa laga yaaba inaad si' fudud u fahanto marka aad isticmaaleyso aqoontaadii hore. joogtee inaad isweydiso su'aalo inta aad aqrinta ku dhexjirto. Marka walbo oo aad dhameyso qeyb (section), jooji aqrinta ee ka jawaab su'aalihii horey aad iskusoo weydisay.

Dib u eegis (review)

Inta badan maku faraxdaa inaad dhameysay buug ama cutub? Inta badan ma isku daboosha/xirtaa buugga marka aad dhameyso aqriska? Ama isla marki ma bilaawdaa cutub cusub?. Hadaba si' aad u hubiso inaad fahantay waxaad soo aqrisay ama si'aad naftaada ugu caawiso iney soo xasuusato wixii aad aqrisay, iskuday istaraatiijiyadan:-

1. Dib u eegis ku same dhamaan wixii aad hoosta ka xariikhday ama qoraalka gaaban aad ka sameysay Inta aad wax aqrineysay kadibna dib u dheh.
2. Mararka qaar waxaa dhacda in qeyb muhiim ah oo cutub ka tirsay in loo qeybiyo dhowr qeyb. Nafsad ahaantaada is weydii sideebey xiriir iskula leeyihiin qeybahaa iyo waliba sida ay xiriir ula leeyihiin cinwaankii weynaa. Ogaanshiyaha sida xiriir uga dhaxeeyo waxay kaa caawinkartaa inaad fahanto warxibin iyo inaad imtixaanka sifiican sameyso.
3. Waxaad dhisataa/sameysataa su'aalo adiga kuu gaar ah kuwaasoo aad kala soo baxday meelaha ugu muhimsan casharka ama buuga. Waxay kaa caawin doonan inaad garato ama xasuusato waqtiwalba.
4. Haddii uu jiro qof aad isla aqrineyseen buuggaa ama cutubkaa, isweydiiya su'aalo qofwalba asaga uu kalasoo baxay buugga, ama inaad isweydisaan erayadda muhiimka ah (vocabulary).

5. Sawirashadda warbixinta: Qodobkan ugu danbeeya aad ayuu muhiin u yahay. inaad sawirato warbixinta waxay kor u qaadi kartaa inaad fahanto iyo inaad dib u dhihi karto qoraalka. Buuggaagta waxaa ku jiraan sawirro (photos), jadwal (table), jaantus/tusmo (illustrations), iyo maabyo (maps), dhamaan kuwaan waxay kaa caawiyaan inaad sawirato waxa aad aqrineyso. Hadey dhacdo meel aad sawir ka filaneysay inaad ka weyso, iskuday inaad adiga qalbiga ka sawirato.

   Marka aad aqrineyso buug sheeko, ama dhacdo gaaban, inta badan wey iska fududahay inaad sawirato waxa dhacaayo, ama sida sheekada u socoto. Waxaa ka dhalata halmar hadad aqriso sheekada inaad isla markii ka sheekeyn karto. Ogow ku celintaa waxaa kaa saaciday sawirashada qaabka sheekada. Sidaa oo kale waxwalbo oo aad aqrineyso iskuday inaad sawirato qaabka waxan usocdaan.

CUTUBKA 4.aad

SIDEE LOO DIYAARIYAA IMTIXAANAADKA?

Si' aad u diyaariso imtixaanka Waa Maxay Tallaabooyinka loo baahanyahay?

Inta aadan imtixaanka gelin waxaad ogaata in ay kuu taalo hawl badan. "nin la sugayoow adna yaad sugi". Goorma ayaad bilaabaysaa diyaar garawga imtixaanka? Ma maalinta imtixaanka? Ma isbuuc ka hor? Ma bil ka hor? Mise……..,

Si' gaar ah u tixgali qodobadan hoos ku qoran kuwaasoo kaa kaalmaynaya sidii aad u diyaar garoobi lahayd.

1. Diyaar garawgaagu waa in uu bilaabmo maalinta aad casharka soo dhigataba. Sida in badan ardaydu ay yeelaan/sameeyan, ha sugin inta imtixaanku kabaabiga ku soo saarayo. Looma baahna in aad soo baraarugto waqti imtixaanku isbuuc ama wax lamid ah ka dhimanyahay, waa inaad diyaar

garowdaa waqti hore, inta aysan Xeero iyo Faldhaan kala dhicin.

2. Garo qaybaha ugu muhiimsan ee maadada aad imtixaanka u galayso. Ha is dawakhinin, hana qaybin/xifdin buugga dhan kor iyo hoos sida dadka qaar sameeyaan. Darsi kasta wuxuu leeyahay nuxur (summary/conclusion). Had iyo goor nuxurka dul istaag, faahfaahintana adigu ku darso markaad imtixaanka timaado.

3. Isku day inaad saadaaliso su'aalaha suuro galka ah in lagu waydiiyo. Haddaad adigu macalin ahaan lahayd, oo aad maadadan imtixaankeeda qaadi lahayd maxaad ardayda waydiin lahayd. Ka soo qaad in imtixaankaagu adkaan lahaa. Su'aalahaas aad ardayda mala awaalka waydiisay, waxaa suuro gal ah inay noqdaan kuwa ku jiri kara imtixaanka.

4. Aqri oo xifdi meelaha aad isleedahay waa muhiin, adigoo raacaya nidaamka xifdinta ee aan kusoo

sheegnay cutubka 1.aad iyo 2.aad, kuwaasoo kala ahaa SQ3R. (**S**urvey, **Q**uestion, **R**ead, **R**ecite, **R**eview) iyo Hora u eegis, Aqrin iyo Dib u eegis. (preview, read and review).

5. Habeenka imtixaanka ka horeeya ha soo jeedin/dhafrin. Seexo oo hel hurdo kugu filan. Ardayda qaar baa wax sii akhriya iyaga oo luloonaya/gamaayoonaya.

6. Goobta/meesha imtixaanku lagu qaadayo/galayo imaaw ugu yaraan nus saac ka hor, si' aad ula sii qabsato jawiga.

CUTUBKA 5.aad

SIDEE LOO MAAREEYA WALWALKA IMTIXAANKA?

Imtixaan sidiisaba waa imtixaan, cabsi iyo walwal waa uu leeyahay. Qof dunidan soo maray kaasoo imtixaan galay, oo aan cabsan majiro. Laakin waxaa la is dheeryahay/lagu kala duwanyahay qaabka cabsida iyo walwalka saameyn ugu yeesho qofka. Ardayda qaar cabsida imtixaanka dartii waxaa ay kasoo tagaan su'aalo fudud oo ay garanayaan jawaabtooda. Marka uu kasoo baxo hoolka imtixaanka ayuu shallaaya/qoomameeya. Taasna looma baahna. Ee marka hore eeg su'aashan jawaabteda.

Waa Maxay Ujeeddada Imtixaanka loo galo/qaado?. Waxaad ogaata Aqoonta looma barto imtixaan, sidoo kalena imtixaan la'aan aqoontu ma xasisho. Hadii aanan imtixaan jirin dadku lama kala garteen, oo waxaa isku mid noqon lahaa midka dadaalka

badan iyo midka leeziga ah (lazy). Imtixaanku Mar waa maskax-tuujin, oo Bani aadamka lagu imtixaana sidii uu wax usoo xasuusan lahaa, marna waa tartan, oo aadanaha ayaa lagu tartansiiya, marna waa guubaabo oo dadka iney wax aqriyaan la rabaa.

Hadaba mawaxaan leenahay imtixaanku waa ujeedadada wax loo bartaa? Maya. Aqoontu maahan imtixaan kaga gudub uun. Ee imtixaanku waa qaabka kamid ah qaababka dadka lagu kala saaro. Imtixaanku kama tarjumi karo aqoontaada rasmiga ee aad ledahay. Kaliya waxaa lagu ogaada waxa aad soo baratay sida aad ufahansantahay.

Waxaan filaaya inaad imtixaano badan horay usoo gashay, hadaba waxaad dib u eegtaa maado kasta ood u baratay sidii aad imtixaan ugaga gudubto/ ubaasi laheyd. Marka aad imtixaanka maadadaa ka soo baxdo hal saac ka dib haddii imtixaan labaad lagaaga qaado, isla maadadii horay aad usoo gashay, waxaa xaqiiqo ah inaanad u garanayn sidii hore,

iskaba daa haddii ay maalmo, bilo ama sannado ka soo wareegaane.

Mar haddiiba niyadaada ay ku jirto imtixaan lee uga gudub, ogow waxaa aad akhriyayso maskaxdu waxay dhigaysaa kaydkeeda ku meelgaarka ah una gudbin mayso kaydka waarista ee mudada dheer.

Haddiise ay kaa tahay aqoon kasbasho iyo inaad naftaada, qoyskaaga, iyo ummadaadaba ku anfacdo haba yaraadee wuxuu u gudbi doontaa qaybta maskaxda ee kaydka waarisa. Taasaana ah tan kugu hareysa, hadhawna aad cidkale u sii gudbin kartaa.

Waqtiyada imtixaanku soo dhawaado waxaa dhacda in qofku dareemo xaalad ka duwan, xaaladii uu ku sugnaa markii hore. Hadaba waxaan rabaa inan halkaan kusoo jeediyo talooyin wax ku ool ah oo ku saabsan imtixaanka.

CUTUBKA 6.aad

WAQTIGA IMTIXAANKU BILAABANAYO

Sidee ayaad Imtixaanka ugu Guulaysan kartaa?

Waqtiga uu kuu bilaawdo imtixaanka, oo aad ku fariisato kusigaaga, dhamaan ardaydane laga qaadayo wixii buugaag ah, waxaa lagaaga baahanyahay in aad taaba galiso/ ku dhaqanto talooyinkaan hoos ku qoran, si'aad unoqoto arday aad ufaraxsan marka uu kasoo baxo imtixaanka, micnaha aadan ka mid noqon ardayda shallaaysa/qoomameysa marka ay kasoo baxaan imtixaanka:-

1. Eeg saacada ku dhaqan darbiga, ama saacadaada, si' aad ulasocoto waqtiga imtixaanka loogu talagalay.

2. Ha nixin, ha walwalin, hana walbahaarin. Waxaa lagu waydiin doona wixii aad soo dhigatay ee aad soo diyaarisay oo kaliya.

3. Aamin naftaada, kalsoonina ku qab inaad garanayso waxa lagu waydiin doono.

4. Iska fogee buugta, waraaqaha, iyo wax kasta oo keeni kara in lagaaga shakiyo qish iyo khiyaano.

5. Marka warqada laguu dhiibo, bisinka Allah ku bilaw, duceysana oo dheh (Illahayow ii fududeey, adigaa waxwalba fududeeye, adiga ayaana murugada ka dhigi kara mid sahal ah). Allahii ku abuurtay ka bari in uu murugada imtixaanka ku heyso kaa dulqaado.

6. Inta aadan wax kale qaban, magacaana ku qor warqadda ama ku qor numberka sirta ah ee lagu siiyey kaasoo u taagan magacaada.

7. Akhri tilmaaha/awaamiirta dhammaan qaybaha imtixaanku ka Kooban yahay si aad u ogaato inta laga shaqaynayo, inta laga tagi karo, kuwa waajibka ah in laga shaqeeyo, IWM.

8. Intaa marka aad soo qabato, Bilaaw ka shaqaynta adigoo ka bilaabaya hadba su'aalaha aad hubto jawaabtooda 100%. Marka labaad ee aad ku soo noqoto ka fikir kuwa aad wax ka garankarto, oo ka shaqey inta aad garaneyso. Marka aad kuwaas dhammayso u kaalay kuwa kugu adkaaday. Su'aalaha adag marwalbo dib udhigo, adigoo waqti ku filan oo looga fikiro usoo reebaya.

9. Waligaa meel maran/banaan ha ka tagin. Ereyada, iyo weedhaha meesha ku yaal inta aad dhuuxdo haddii aanad xasuusnayn jawaab sax ah, isku day inaad qiyaas xikmadaysan samayso waxaaba laga yaaba inaad ku guulaysato. **F.G.** waxyaaabaha la qiyaasayo ama si' xigmadeysan looga jawaabo kama mid aha diinta- aayadaha quraanka iyo xadiith ta, iyo wixii la mid noqonkara.

10. Ugu danbeyn wixii aad jawaab ka bixin weydo Weydii macallinka ama cidda ilaalinaysa haddii la oggol yahay in wax la weydiyo.

11. Ha degdegin, hubi inaad dhammaysay, inaad saxday iyo inaad jawaabaha wada dhamays tirtay.

12. Ha walwalin hana degdegin haddii aad aragto ardayda qaar oo kaa hor dhamaysay, waayo iskuma xernidiin ee adigu wakhtigaaga uun ilaasho inaanu kaa dhicin.

13. Mar labaad hubi inaad magacaaga, iyo wixii kale loo baahnaaba ku qortay.

N.B hanoqonin qofka ugu soo horeeya ee dhiiba warqada, kana baxa hoolka imtixaanka. Sug inta waqtiga bixitaanku soo dhawaanayo.

Cutubka 7.aad

GUNAANADKA BUUGA

Ardayga wanaagsani waxbarashada hadaf ayuu ka leeyahay, ee kama aha qayrkaaba wuu bartaaye adna samee. Astaanta lagu garto ardayga wanaagsan waxaa ka mid ah qadarinta macalimiinta, maqnaansho la'aan, lasocodka casharka xiliga sharaxaada iyo kadib, ka qeyb qaadashada nashaadaadka fasalka iyo kuwa xarunta waxbarasho ee uuu joogo iyo kuwo kale ee aan soo tilmaanay. Dhanka kale marka aan kasoo hadalnay dhanka diyaarinta casharada iyo imtixaanaadka waxaan soo sheegnay qaab loo diyaariyo oo aan dhahnay SQ3R iyo hora u eegis (preview), aqrin (read) and dib u eegis (review).

Ardayga u diyaarsan imtixaanka waa midka isku kalsoon, iskana fogeeya dhamaan wixii looga shakin kara qish iyo khiyaaro ama ka fogaada inuu eeg eego meela kale sida ardayga dhinaciisa fadhiyo.

Marka hadafkaadu cadyahay ma noqonaysid imtixaan-u-noole. Imtixaan-u-noolayaashu way dhayalsadaan waxbarashada, way iska baashaalaan, marka dambana walwal iyo walbahaar ayaa soo wajaha. Ardayga ujeeddo wax u baranaya ee soo diyaar garoobayna waxaad arkaysaa asagoo hore u galaya goobta imtixaanka, buugta iyo waraaqaha iska fogaynaya, diyaarna u ah inuu galo imtixaanka. Wuxuu filayaa inuu garanayo su'aalaha la waydiin doono.

Ha noqon dadka werwera ee maskaxdu ka lunto marka goobta imtixaanka la yimaado. Is deji naftana u sheeg inaan mushkiladi jirin ee wax aad garanayso uun lagu waydiinayo.

Noloshaada iyo wakhtigaagaba qorshee, si' ay suuro gal kuugu noqoto inaad diyaar garawdo inta aan imtixaanba kuu iman, maalmaha imtixaankana waa inaad xooga saartaa meelaha muhiimka ah, waa

inaad is imtixaantaa adiga oo odorosaya su'aalaha kuu iman kara, jawaabna u raadinaya.

"Allah waxaan ka baryayaa inuu imtixaanada dunida iyo kuwa aakhiraba inoo fududeeyo."

AAAAAMIN……

Tixraac

1. http://www.weedhsan.com/index.php/barnaamijyo/6346-sidee-ayaad-ugu-diyaar-garoobi-kartaa-uguna-guulaysan-kartaa-imtixaannada-wq-cabdiraxmaan-cali-xirsi.

2. Robert H. Lavenda and Margaret Rauch **Study Strategies Guide to Accompany**

3. http://www.wiki.com/How to be a successful student

Waad ku mahadsantahay aqriskaada.

Hadaad aragtay qaladaad ku jira buugga, waad soo gudbinkartaa. Adigoo kusoo diri kara wixii su'aal ah email lada hoos ku qoran.

mahadsanid

Wixii comment ah waxaad kusoo diri kartaa

Ahmedy897@gmail.com ama

Sharafcade1990@hotmail.com

AUTHOR

AHMED YUSUF MATAN

Soo saaristii 2aad